Bundesamt
für Migration
und Flüchtlinge

# Xaashida macluumaadka ee ku saabsan koorsada isdhexgalka

loogu talagalay

- magangalyo doonada haysta ogolaanshaha inay ku sii sugnaadaan go'aanka magangalyada (Aufenthaltsgestattung) sida waafaqsan Qaybta 55 (1) ee xeerka magangalyada (AsylG)
- ajaanibta leh hakinta ku meel gaarka ah ee masaafurinta sida waafaqsan Qaybta 60a (2) xukunka 3-aad AufenthG
- ajaanibta leh hakinta ku meel gaarka ah ee masaafurinta sida waafaqsan Qaybta 60a (2) xukunka 3-aad AufenthG iyada oo ay la socota hakinta ku meel gaarka ah ee u masaafurinta ujeeda tababar (Ausbildungsduldung) iyadoo la raacayo Qaybta 60c (1) AufenthG ama hakinta ku meel gaarka ah ee u masaafurinta ujeeda shaqo (Beschäftigungsduldung) iyadoo la raacayo Qaybta 60d (1) AufenthG
- ajaanibta haysata sharciga deganaanshaha ku meel gaarka ah sida waafaqsan Qaybta 24 AufenthG ama Qaybta 25 (5) AufenthG

Mudane ama Marwo qaali,

Waxaad ka dalban kartaa Xafiiska Federaalka ee loogu talagalay Socdaalka iyo Qaxootiyada (BAMF) si aad isaga diiwaangeliso koorsada isdhexgalka. Tan awgeed, waa inaad buuxisaa mid ka mid ah shuruudaha soo socda:

- Waxaad tahay codsade magangalyo-doon oo waxaad haysataa fasax aad ku joogto

ama

- Waxaad haysataa hakinta ku meel gaarka ah ee masaafurinta sida waafaqsan Qaybta 60a (2) xukunka 3-aad AufenthG ama ogolaanshaha degenaanshada ku meel gaarka ah iyadoo la raacayo Qaybta 24 AufenthG ama Qaybta 25 (5) AufenthG.

Carruurta, dhallinyarada iyo da' yarta weli looga baahan yahay inay dugsiga tagaan kama qaybqaadan karaan koorsada isdhexgalka.

## Waa maxay koorsada isdhexgalka?

Koorsada guud ee isdhexgalka waxay ka kooban tahay laba qaybood, koorsada luqadda iyo koorsada la qabsiga.

Koorsada luqadda waxaad ku baraneysaa kalmadaha aad u baahan tahay inaad ku hadasho oo aad

Tixraac 630.121k Somalisch BAMF 11/2023

qorto nolosha maalinlaha ah. Tani waxaa ka mid ah la xiriirka maamulada, la sheekaysiga deriska iyo goobta shaqada, qorista warqado iyo buuxinta foomamka.

Koorsada la qabsiga waxay kugu wargelinaysa wax ku saabsan nolosha Jarmalka. Halkan waxaad ka baran doontaa wax ku saabsan nidaamka sharciga, dhaqanka iyo taariikhda dhow ee dalka.

Koorsada guud ee isdhexgalka waxa ay ka kooban tahay koorsada luuqada oo ka kooban 600 oo cutub oo cashar ah (halka cutub ee casharka waxa uu soconayaa 45 daqiiqo) iyo koorsada la qabsiga oo ka kooban 100 cutubood oo cashar ah. Koorsada luqaddu waxay ka kooban tahay lix qaybood oo koorso ah, mid walbana wuxuu leeyahay 100 cutub oo cashar ah. 300 cutubood ee casharka ee ugu horreeysa waxa loo yaqaana koorsada aasaasiga ah (Basiskurs), 300 cutubood ee casharka ee ku xigta waxa loo yaqaana koorsada luqadda hormarsan (Aufbausprachkurs).

Waxa sidoo kale jira koorasyo gaar ah oo isdhexgalka ah, tusaale ahaan loogu talagalay dumarka, waalidiinta, dhallinyarada da' yarta ah iyo dadka aan awoodin inay si sax ah wax u akhriyaan waxna u qoraan. Koosaskani waxay ka kooban yihiin 1,000 cutubood oo casharro ah.

Haddii aad gaar ahaan si degdeg ah wax u barato, waxaad tagi kartaa koorso degdeg ah.

Machadyada bixiya koorasyada isdhexgalka, waxa loogu yeero “bixiyaha koorsada” (Kursträger), ayaa kaa qaadi doono tijaabada meelaynta ka hor inta aysan koorsadu bilaaban. Tani waxa loogu danleeyahay si loo go'aamiyo koorsada iyo qaybta koorsada kuugu fiican inaad ku bilowdo. Tijaabada meelaynta waa lacag la'aan.

## Ka qaybqaadashada tijaabada ugu dambeeysa

Tijaabada ugu dambeeysa waxay ka kooban tahay imtixaan luqadeed iyo imtixaan dhammaadka koorsada la qabsiga oo loo yaqaano “Ku noolaanshaha Jarmalka” (Leben in Deutschland). Haddii aad ku muujiso aqoonta kugu filan ee Jarmalka ee tijaabada luqadda (heerka luqadda B1) oo aad ku guulaysato tijaabada “Ku noolaanshaha Jarmalka”, waxaad si guul leh u dhammaysatay koorsada isdhexgalka. Waxaad markaa ka dib heli doontaa “shahaadada koorsada isdhexgalka” (Zertifikat Integrationkurs).

Haddii aad ku guulaysan weydo mid ka mid ah ama labada tijaabood, waxa aad helaysaa shahaado muujinaysa natiijadaada.

Ka qaybgalka tijaabada ugu dambeeysa waa lacag la'aan.

## Diiwaangelinta koorsada isdhexgalka iyada oo loo marayo Xafiiska Federaalka iyo iska diiwaangelinta bixiyaha koorsada

Fadlan si buuxda oo sharci ah u buuxi codsiga gelitaanka. Haddii cinwaanka aad bixisay uu ku hoos qoran yahay magac kale, xaqiiji inaad buuxiso qaybta “Haddii ay habboon tahay, degan (c/o)” (Ggf. wohnhaft bei (c/o)), haddii kale boostada lama gaarsin karo. Ku soo lifaaq dukumeentiyada ku qoran codsiga ka dibna u dir cinwaanka lagu sheegay dukumeentigaas.

Markaad saxiixdo codsiga gelitaanka, waxaad ogolaatay Xafiiska Federaalka ee loogu talagalay

Socdaalka iyo Qaxootiyada inay ururiyaan, habeeyaan oo u isticmaalaan xogta la soo ururiyey ujeeddada lagu qabanayo koorsada isdhexgalka.

Marka loo baahdo, saxiixaagu wuxuu sidoo kale daboolayaa isbarbardhigga xogta laga heli karo Diiwaanka Dhexe ee Ajaanibta (Ausländerzentralregister). Waxaa la hubinaaya haddii aad fasax u haysato inaad ku sii jirto iyadoo la raacayo Qaybta 55 (1) AslyG, hakinta ku meel gaarka ah ee masaafurinta sida waafaqsan Qaybta 60a (2) xukunka 3-aad AufenthG ama ogolaanshaha degenaanshada ku meel gaarka ah iyadoo la raacayo Qaybta 24 AufenthG ama Qaybta 25 (5) AufenthG.

Haddii lagu ogolaado inaad ka qaybgasho koorsada isdhexgalka, waxaad ka helaysaa “shahaadada u-qalmitaanka” Xafiiska Federaalka si aad u xaqiijiso inaad xaq u leedahay inaad dhigato koorsada isdhexgalka. Bixiyeyaasha koorsada iyo goobaha koorsada ee agagaarkaaga iyo sidoo kale laantaada heer gobol ee Xafiiska Federaalka ayaa laga heli karaa barta intarnetka:

https://bamf-navi.bamf.de/de/

Xasuusnow: Haddii aad hore u heshay shahaadada u-qalmitaanka koorsada isdhexgalka markii aad soo gudbisay codsiga magangalyada ama intii lagu guda jiray waraysiga shakhsiyeed ee habraaca magangalyada, markaa ka dib gabi ahaanba uma baahnid inaad codsato ogolaanshaha koorsada.

Oggolaanshahaaga koorsada wuxuu soconaaya hal sano. Shahaadada u-qalmitaanka waxa ay ka kooban tahay ilaa taariikhda gelitaankaaga u sax yahay. Fadlan iskaga diwaangeli koorsada isdhexgalka goobta lagu siiyay oo halkaas ku soo gudbi shahaadadaada u-qalmitaanka. Haddii aan lagu siin goob gaar ah, iska diiwaangeli sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogalka ah bixiyaha koorsada aad doorotay.

Si loo xaqiijiyo xaadiritaanka koorsada degdega ah, Xafiiska Federaalku wuxuu kuu diri karaa bixiye koorsa oo gaarka ah.

Bixiyaha koorsada waa inuu ku ogeysiiyaa bilowga la filayo ee koorsada. Koorsadu waa inay ku bilaabataa lix toddobaad gudahooda laga bilaabo diiwaangelintaada. Haddii aysan jirin wax koorso ah oo la heli karo inta lagu jiro waqtigan, bixiyaha koorsada waa inuu ku soo ogeysiiyaa tan.

Fadlan la soco in u-qalmitaanka ka qaybgalkaagu uu dhacayo haddii, sababaha aad gacanta ku hayso, aadan bilaabin koorsada isdhexgalka hal sano gudahiisa markaad isdiiwaangeliso ama haddii aad joojiso imaanshaha koorsadaada muddo ka badan hal sano.

### Imaanshaha munaasabka ah ee koorsada

Si loo gaaro ujeedada koorsada isdhexgalka, waa inaad si munaasab ah uga qaybqaadataa koorsada. Taas macnaheedu waa inaad si joogto ah u xaadirto casharrada ilaa dhammaadka koorsada oo aad qaadato imtixaanka ugu dambeeya. Bixiyahaaga koorsada ayaa qoraal ahaan kugu xaqiijin doona imaanshahaaga saxda ah haddii aad rabto.

### Daryeelka carruurta

Haddii aad u baahan tahay xanaanada carruurta si aad awood ugu yeelato inaad ka qaybgasho koorsada isdhexgalka, fadlan la xiriir bixiyaha koorsada. Waxay ku soo ogeysiin doonaan ikhtiyaarada daryeelka ilmaha ee la heli karo.

### Beddelka bixiyaha koorsada

Si guud, waxaa kaliya laguu ogolyahay inaad beddesho bixiyahaaga koorsada ka dib markaad dhammayso qaybta koorsada. Beddelku waxa kaliya oo uu suurtagal yahay marka ay jiraan duruufo gaar ah, gaar ahaan haddii aad guurto, haddii aad u kala beddelato inta u dhaxaysa koorsooyinka wakhti-dhiman iyo kuwa waqti-buuxa, si aad awood ugu siiso daryeelka carruurta ama aad u qaadato tababar ama shaqo faa'iido leh ka dib markaad dhammayso qayb ka mid ah koorsada.

Haddii aad u bedesho sababo kale, waxaad waayi doontaa cutubyada casharka ee qaybta koorsada ee aadan xaadirin.

Haddii ay dhacdo isbeddelka la oggol yahay, bixiyaha koorsadu waa inuu kuu soo celiyaa shahaadada u-qalmitaanka.

### Kharashaadka koorsada isdhexgalka

Ka qaybqaadashada koorsadu wax lacag ah kuguma fadhiso.

### Kharashaadka safarka

Waxaad ka dalban kartaa Xafiiska Federaalka gunno si ay kaaga caawiso kharashaadka safarkaaga ee ku aadan koorsada isdhexgalka. Si aad u hesho tan, goobta koorsadu waxay u baahan tahay inay ugu yaraan masaafo 3 km u jirto gurigaaga. Gunnada waxaa loo bixiyaa si sicir-jaango'an. Fadlan u dir codsiga laanta gobolka ee Xafiiska Federaalka ee ka mas'uulka ah goobta aad degan tahay. Waxaad ka heli kartaa barta intarnetka ee https://bamf-navi.bamf.de/de/.

### Ku celcelinta ugu badnaan 300 cutub cashareed oo ka mid ah koorsada luqadda

Xaaladaha qaarkood, waxaad hal mar ku celin kartaa ilaa 300 cutub cashareed oo koorsada luqadda ah. Taas awgeed, waxaad u baahan tahay inaad si buuxda u xaadirto koorsada luqadda, aad qaadataa imtixaan luqadeed ka dib oo aadan muujin aqoon kugu filan oo Jarmal ah (heerka luqadda B1).

Si aad uga qaybgasho casharada ku celiska ah, codsi ayaa loo baahan yahay. Fadlan u gudbi codsiga laanta gobolka ee Xafiiska Federaalka ee ka mas'uulka ah goobta aad degan tahay.

Haddii aad dhiganayso koorsada akhris-qoraalka, uma baahnid inaad marka hore gasho imtixaanka luqadda si aad ugu celiso 300 cutub ee casharka ah.

### Maxay yihiin waxyaabaha kale oo ay tahay inaad ogaato

Waxaad sidoo kale ka heli kartaa dhammaan foomamka codsiga ee lagu sheegay xaashidan macluumaadka ee ka socota bixiyaha koorsada, ka socota maamulkaaga ajaanibta ama ka socota laanta gobolka ee Xafiiska Federaalka ee ka masuulka ah meesha aad degan tahay. Waxaad sidoo kale foomamka ka heli doontaa barta mareegta ee: https://www.bamf.de/formulare.

Waxaad sidoo kale ikhtiyaar u leedahay inaad ugu gudbiso codsiyadaada Xafiiska Federaalka si dhijitaal ah adigoo u sii maraya Madasha Federaalka (Bundesportal).

Codsiyada soo socda ayaa lagu heli karaa qaab dhijitaal ah:

- Codsiga ogolaanshaha ee ku aadan koorsada isdhexgalka
- Codsiga ogolaanshaha in lagu celiyo ugu badnaan 300 cutubood oo casharka koorsada luqadda ah
- Codsiga gunnada safarka oo ay ku jirto bixinta gunno maalinle ah oo sarreeysa

Waxaad ka geli kartaa codsiyada onlaynka ah ee Madasha Federaalka adigoo isticmaalaya cinwaanka Intarneetka:

Cinwaanka internetka codsiga onlaynka ah (Internet address for the online applications)

Waxaad ka heli kartaa dhammaan macluumaadka dheeraadka ah barta codsiga onlaynka ah ee:

Cinwaanka internetka ee macluumaadka codsiga onlaynka ah (Internet address for information on the online application)

Fadlan sidoo kale ogow adeegyada ay bixiyaan xarumaha la-talinta socdaalka (Migrationsberatungsstellen) iyo adeegyada socdaalka dhallinyarada (Jugendmigrationsdienste). Waxay kaa caawin doonaan codsiyada, waxay ka jawaabi doonaan su'aalaha waxayna wax ka qaban doonaan dhibaatooyinkaaga waxayna kuu heli karaan koorsada isdhexgalka kugu habboon. Waxaad ka heli kartaa meelaha ay ku yaalaan xarumaha la-talinta socdaalka iyo adeegyada socdaalka dhalinyarada ee aaggaaga ama midkood maamulkaaga ajaanibta ah, ee ka socda laamaha gobolka ee Xafiiska Federaalka ama barta intarnetka https://bamf-navi.bamf.de/de/.

Xaashida macluumaadka waxay ka kooban tahay macluumaadka ugu muhiimsan ee adiga kugu saabsan ka qaybqaadashada koorsada isdhexgalka. Bixiyaha koorsada ayaa sidoo kale ka jawaabi kara su'aalaha dheeraadka ah.

Markaad dhiganayso koorsada isdhexgalka, laguuma dabooli doono caymiska shilalka sharciga ah.

Ka qaybgalka koorsada isdhexgalka wax raad ah kuma laha habraacaaga magangalyo-doonimada.

Waxaan kuu rajeyneynaa inaad guul ku gaarto dhigashada koorsada isdhexgalka!